

ISDIWAANGELI OO DIYAARGAROW SI AAD U NOQOTO GOLDEN GOPHER



Markuu ardaygaagu dhammeeyo dugsiga sare oo uu isku diyaariyo inuu bilaabo sannadka uu ka yahay *ardayga cusub U of M*, Waxaan rabnaa inaad ogaato macluumaadka soo socda kahor inta aan ku soo dhaweyn ardaygaaga dhismaha jaamacadda.

Xaqiiji isqorista



Marka ardaygu loo ogolaado Jaamacada Minnesota Twin Cities waxaa jira qaabab badan oo aan ugu soo dhaweyno bulshada *Golden Gopher*! Balse marka hore, waa inay xaqiijiyaan diiwaangelintooda iyadoo bixinaya \$280 oo ah khidmada xaqiijinta ee aan *celinta-lacageed laheyn*. Tallaabadan waxay na ogeysiinaysaa inay dhigan doonaan. Lacagtan waxaa lagu bixin karaa barta z.umn.edu/confirm.

Waqtiga kamadambaysta ah ee la soo gudbinayo khidmadan xaqiijinta ah waa 1-da Maayo. Haddii ardaygu uusan xaqiijin isqoristiisa, diiwaangelintiisa waa laga *noqon karaa*.

Gudbi dukumiintiyada ugu dambeeya



Ardaydu waa inay soo gudbiyaan warqada buundooyinka ee ugu dambeysay ee dugsiga sare si loo xaqiijiyo inay dhammeeyeen sannad-dugsiyeedkooda ugu dambeeyay oo ay qalin jabiyeen. Ardaydu waa inay warqada buundooyinka dugsiga sare u soo gudbiyaan U of M ugu dambeyn 1-da Luulyo.

Haddii ardaygaagu doorto in si iskiis ah u soo weriyo natiijooyinka ACT ama SAT si dib-u-eegis loogu sameeyo iyadoo qayb ka ah arjigooda, buundooyinkooda rasmiga ah ee imtixaanka waa in la soo gudbiyaa ugu dambeyn 1-da Luulyo.

Fadlan ogow: Jaamacadda Minnesota Twin Cities uma baahan doonto buundada imtixaanada ACT ama SAT ee codsadeyaasha 2021.

Siyaasadda U of M waxay qabtaa in ardayda ka qalin jabiyaan dugsiga sare ama ay ku baasaan imtixaanka GED kahor inta aysan u-qalmin inay isku diiwaangeliyaan fasallo heer jaamacadeed ah. Warqadaha buundooyinka ee dugsiga sare ayaa ka caawiya sidii loo xaqiijin lahaa in ardaydu ay buuxiyeen shuruudan. Intaas waxaa sii dheer, warqadaha buundooyinka ee kamadambeysta ah waxaa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo buundooyinka ku qoran *diiwaanka tacliinta la soo weriyay* ee ardayga. Haddii arday uu si khalidan uga warbixiyay darajoyinkiisa, ama uusan soo gudbin dukumiintiyadaan, diiwaangelintooda waa laga noqon karaa.

Kaqeybgal jaheynta xagaaga



Marka la joogo U of M, *jaheynta* waa dhacdo loogu talagalay ardayda inay ka caawiso fududeynta u gudubka *nolosha kulliyada*. Inta lagu gudojiro dhacdadan waajibka ah, ardayda ayaa la kulmi doonaan *la-taliyahooda*, isku diiwaangelin doono casharrada, ku hoyan doonna habbeenkii hoolalka la deggo, oo la kulmi doonaan ardayda kale ee cusub. Kadib marka la xaqiijiyo diiwaangelintiisa, ardaygaagu wuxuu heli doonnaa macluumaad ku saabsan xulashada taariikhda jaheynta.

Fadlan ogow: Jaheynta shaqsiyeed waxaa loo wareejiyay qaab onlayn ah iyadoo ugu wacan tallaabooyinka badqabka ee COVID-19 ee deyrta 2020. Jaamacadda Minnesota waxay la socon doontaa xaaladda waxayna soo sheegi doontaa qorshe marka la heli karo.

Eeg wadaxiriirada oo ku xirnaaw



Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan jaheynta, hoyga iyo kaalmada maaliyadeed waxaa soo diri doonna xafiisyada kale ee U of M. Inkastoo Xafiiska Diiwaangelinta kaa caawin karo ka jawaabista su'aalaha ku saabsan mawduucyadaan, mar alla markuu ardaygu soo gudbiyo khidmadiisa xaqiijinta, xafiisyada kale ee ku yaala dhismaha jaamacadda waxay bilaabi doonaan inay u diraan ardayda macluumaadka, hawlaha la dhammaystirayo, iyo waqtiyada kamadambeysta ah. Waxaan ku dhiirigalinaynaa qoysaska inay xusuusiyaan ardaydooda inay inta badan eegaan iimaylkooda!

Su'aalo na weydii



Waxaan ku dhiirigelinaynaa qoysaska iyo ardayda inay su'aalo na weydiyaan markay isu diyaarinayaan sannadka ay ardayda cusub yihiin. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala xiriir U of M Office of Admissions (Xafiiska Diiwaangelinta) telefoonka 612-625-2008 ama 1-800-752-1000, ama la xiriir mid ka mid ah *talo-bixiyeyaashayada diiwaangelinta* barta [z.umn.edu/counselor](https://www.z.umn.edu/counselor). Waxaan ku faraxsannahay inaan ka jawaabno su'aalahaaga ku saabsan waxa la filan karo Golden Gopher ahaan!

ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
Admissions Counselor	Talo-bixiyaha Diiwaangelinta	Xubin shaqaale ka ah kulliyad oo taageera ardayda inta lagu gudojiro safarkooda raadinta kulliyad
Advisor	La-taliyaha	Xubin ka tirsan shaqaalaha jaamacadda oo ka caawiya ardayda inay doortaan shaqada koorsada iyo horumarka dhanka qalinjabinta
College Life	Nolosha Kulliyada	Mahadhooyinka iyo fursadaha ay ardaydu heli doonaan arday ahaan
Confirmation Fee	Khidmadda Xaqiijinta	Lacag ardaygu bixiyo si loo xaqiijiyo isqoristiisa
Freshman	Arday Cusub	Arday ku jira sannadka koowaad ee kulliyada
Golden Gopher	Golden Gopher	Naaneys loogu talagalay ardayda dhigata Jaamacadda Minnesota Twin Cities, oo loogu magacdaray doobirka dugsiga, Goldy Gopher
Orientation	Jaheynta	Barnaamij xagaaga la qabto oo waajib ah oo ardayda u soo bandhigo dhigaalada iyo fursadaha ka jira dhismaha jaamacadda
Rescind	Ka Noqo	Xulasho kulliyadu sameyso si ay u baajiso diiwaangelin arday
Self-Reported Academic Record	Diiwaanka Tacliin ee La Soo Weriyo	U of M waxay ardayda ka dooneysaa inay uga warbixiyaan natiijooyinka imtixaankooda iyo dhibcaha dugsiga sare gudaha arjigooda - taasoo macnaheedu yahay inaysan u baahnayn inay keenaan dukumiintiyo rasmi ah ilaa iyo inta laga diiwaangelinayo. Fadlan ogow: Dhibcaha imtixaanada ACT/SAT looma baahna in lagu qoro arjiga 2021.
U of M	U of M	Magaca la soo gaabiyay ee Jaamacadda Minnesota Twin Cities